



UJEEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **18/05/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa Xafiiskeyga iigu yimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYAHAA 1AAD:- Abdulqadir Mohamed Said, Hooyo: Xabiibo Cali Abtidoon, Somali ah, Ku Dhashay: Baidoa, Sanadkii: 1975, Degan Uk Hadana Ku Sugaan Muqdisho, Sita: British Pass.l.r., Lr. 127004127.

LA WAKIISHE:- Sakariye Yaasiin Axmed, Hooyo: Xabiibo Cali Abtidoon, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1986, Degan Muqdisho, Sita: Somali Passport, Lr. P00473135

WAKAALAD BIXISADA 2AAD:- Ubax Abgal Said, Hooyo: Xabiibo Cali Abtidoon, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 1970, Degan Uk Hadana Ku Sugaan Muqdisho, Sita: British Pass.l.r., Lr. 575129408

B- Anaga oo kala ah **ABDULQADIR MOHAMED SAID & UBAX ABGAL SAID**, Waxaan qoraalkaan si wadajir ah ku Cadaynaynaa Anaga oo Maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka Fayow Cid Na Khasbaysana Aysan jirin in aan Wakiilanay Walaalkeen **SAKARIYE YAASIIN AXMED** Una Wakiilanay Wakaalad Guud, oo Ku Saabsan Qayb Dhaxlaydka aan Ku Leenahay Dhaxalka **Hooyadeen Marxuumad Xabiibo Cali Abtidoon oo Sii Dhaxlaysa Ninkeedii Marxuum Yaasiin Axmed Xuseen**, in Qaybteena uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Hantidaas oo Iskugu Jirta guurto & iyo ma guurto, Mood iyo Nool intaba, Waxaan mar kale sii caddeynaynaa in **SAKARIYE YAASIIN AXMED** awoodaas aan siinay uu u madax banaan yahay oo anaga Qeyb dhaxaleedkaas aan soo sheegnay ka macaamilideeda wax nalooga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **SAKARIYE YAASIIN AXMED**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyeen Abdulqadir Mohamed Said & Ubax Abgal Said, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHAA 1-AAD
ABDULQADIR MOHAMED SAID

Said

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA 2-AAD
UBAX ABGAL SAID

Ubax

SAXIIXA LA WAKIISHAHA
SAKARIYE YAASIIN AXMED

Sakariye

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- C/LAAHI MUUSE KHAYRE

2- C/LAAHI ABUUKAR MAXAMED

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 173/T.P.N/22, Tr. 18/05/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- Abdulqadir Mohamed Said, 2- Ubax Abgal Said Ahna (Wakaalad Bixiyayaal), 3- Sakariye Yaasiin Axmed Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha**, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: Shaxane



NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"

MASAWIRKA WAKALAD BIXIYAHA 1-Aad


MASAWIRKA WAKALAD BIXSADA-2Aad

MASAWIRKA LA WAKIISHAHA

Abdulqadir Mohamed Said

Ubax Abgal Said

Sakariye Yasiin Axmed



=MARKHAATIYAASHA=

1: C/Ilaahi Muuse Khayre

2: C/Ilaahi Abuukar Maxamed






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 22/05/2022

Aniga oo ah **Sayidcumar C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Sakariye Yaasiin Axmed** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 173/W.P.N/22, Tr. 18/05/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Sakariye Yaasiin Axmed
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyeyaasha Abdulqadir Mohamed Said Ubax Abgal Said
Taariikhda Wakaalada	18/05/2022

La Wakiishe: Aniga oo ah **Sakariye Yaasiin Axmed**, Leh Tel No. **0615301455**, Degan **W/leey** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayidcumar C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Sakariye Yaasiin Axmed